

Waxa buundadii hore ee Svinesund loo furayaa socdaalka ka soo gudbaya xadka ee wata shahaado koroona oo shaqaynaysa

Warsaxafadeed | Taariikh: 27.08.2021

| Lr: 134 – 2021

Dawladdu waxay rabtaa in ay culayska ka yarayso xadka ku ag yaalla Svinesund, taas darteedna waxa ay dadka wata shahaado koroona oo shaqaynaysa u oggolaanaysaa in ay ka soo gudbaan buundadii hore ee Svinesund. Waxa shardi ah in dhammaan dadka baabuurka ku jira wataan shahaado koroona oo shaqaynaysa.

Arrintani waxa ay culayska ka yaraynaysaa dadka ku qasban in ay soo maraan barta kastamka ee ku ag taalla buundada cusub.

– Si mashquulka looga yareeyo buundada cusub ee Svinesund, waxa ay dawladdu go'aamisay in ay buundadii hore ee Svinesund u furto dadka soo bandhigi kara shahaado koroona oo shaqaynaysa. Waxa aan hoosta ka xarriiqayaa in ay shardi tahay in dhammaan dadka baabuurka ku jira ay yihiin dad si buuxda u tallaalan ama covid-19 ku dhacay lixdii bilood ee u dambeeyay. Carruurta aan xeer-hoosaadka covid-19 ee isaga gudbidda xadku ka dhaafin arrintan waa in ay weli isticmaalaan buundada cusub ee Svinesund. Sidaas si la mid ah ayaa khuseysa socdaalka u baahan in ay wax soo mariyaan Hay'adda Kastamka, ayay tidhi Monica Mæland – wasiirka cadaaladda iyo heeganka.

Ujeedadu waxa weeye in la yareeyo safafka buundada cusub oo xilligii xagaaga ay ka jireen safaf dhaadheer dadkuna saacado badan sugayeen in ay soo dhaafaan xadka. Safafka dhaadheer ayaa dhibaato weyn ku ahaa gaadiidka sida badeecadaha culus oo ku qasbanaa in ay soo maraan buundada cusub ee Svinesund maadaama barta hubinta ee Hay'adda Kastamku halkaas ku taallo.

– Waxa horumarin lagu sameeyay aagga hubinta, si hawlaha hubinta socdaalka soo maraya buundadii hore ee Svinesund loo samayn karo qaab sidii hore ka dhakhso badan. Waxannu rajaynaynaa in arrintani ay guud ahaan fududayso ka soo gudubka xadka, ayay Mæland tidhi.

Maadaama ay marba marka ka sii dambaysa sii kordhayaan dadka waddanka deggan ee si buuxda u tallaalan ama soo bandhigi kara shahaado koroona oo shaqaynaysa, waa in lagu talogalo in saxmaddu sii badato. Haddii la rabo in nidaamka hubinta ee maanta jira uu sii jiro, waxa taas darteed loo baahan yahay in mashquulka laga yareeyo buundada cusub ee Svinesund si loo yareeyo wakhtiga sugitaanka ee gaadiidka sida badeecada culus.

Wax-ka-beddelkani waxa uu dhaqangalayaa saq dhexe habeenka Sabtida 28-ka Ogos.